# Cillada liiska sugitaanka barnaamijka Children’s Extraordinary Needs Program – Su’aalaha inta badan la isweydiiyo

La cusbooneysiiyay: Oktoobar 10, 2024

## Cillad noocma ah ayaa saamaysay liiska sugitaanka ee barnaamijka Children’s Extraordinary Needs (CEN) Program?

Markay ahayd Oktoobar 8, xafiiska ODDS ayaa ogaaday cillad muuqashada xogta ah. Cilladu waxay saamaysay sida isku-duweyaasha u eegi jireen liiska sugitaanka ee barnaamijka CEN Program. Liiska sugitaanka ayay ka eegaan nidaamka onlaynka ah ee loo yaqaano eXPRS. Laga bilaabo Sitembar 5 ilaa Oktoobar 10, lamabarrada liiska sugitaanka ee 30 carruur ah ayaa si khaldan uga soo muuqdeen nidaamka eXPRS.

Xafiiska ODDS ayaa saxay cilladda muuqashada xogta ee ku timid nidaamka eXPRS markay ahayd Oktoobar 10. Shaqaalaha ayaa dib-u-eegis gacan ku sixid ah ku sameeyeen xogta liiska sugitaanka ee ku jirta nidaamka eXPRS. Waxay xaqiijiyeen in tirada carruurta ee ku jirta liiska sugitaanka ay hadda saxan tahay.

Waxaan ka cudur daaranaynaa jahawareer kasta oo ay cilladan ku keentay xubnaha bulsheed ee qaba naafanimada garaadka iyo korriinka (I/DD).

## Muxuu sameeyay xafiiska ODDS si uu cilladan u saxo?

Waalid ayaa xafiiska ODDS u sheegay cillada markay ahayd Oktoobar 8. Isla markiiba, falanqeeyaha sare ee nidaamka eXPRS ee xafiiska ODDS ayaa dib-u-eegis ku sameeyay xogta liiska sugitaanka. Way ogaadeen sababta keentay cillada muuqashada xogta. Way saxeen xogta. Gacanta ayay ku saxeen oo ku xaqiijiyeen in xogta dhammaan 1,378 carruurta ah ee ku jira liiska sugitaanka ay hadda si sax ah u soo muuqan karto. Sixitaanada ayaa hubin doona saxnaanta liiska sugitaanka si horay loogu sii ambaqaado. Isku-duweyaasha adeegyada ayaa hadda arki doona xogta saxda ah ee diiwaanada carruurta ee ku jira nidaamka eXPRS.

## Ciddee ayey macluumaadkiisa cilladu saamaysay?

Cilladu waxay saamaysay soo muuqashada xogta 30 carruur ah. Carruurtani ayaa lahayd lambarrada liiska sugitaanka ee barnaamijka CEN Program ee asalka ahaa ee u dhexeeyay 61 iyo 91.

Laga bilaabo bisha Sitembar 5–Oktoobar 9, lambarradan qoran ee carruurta ayaa ahaa kuwa ay ku timid cilladda ah 2 ilaa 16 meelood. Waalidiinta carruurtan ayaa keliya helayay macluumaad khaldan marka ay isku-duwaha ka codsadaan adeegyada ilmahooda ee ku jira liiska sugitaanka muddadaas.

Haddii ilmuhu haysto lambarka liiska sugitaanka ee asalka ah ee ka baxsan lambarrada 61–91, cillada muuqashada xogta ma aysan saamayn xogtooda.

### Muxuu ahaa lambarka liiska sugitaanka ee ilmahayga ee asalka ah?

Bishii Maajo, xafiiska ODDS ayaa waalidiinta iyo mas'uuliyiinta carruurta ugu diray liiska sugitaanka boostada warqad ahaan. Warqaddan waxaa la socda lambarka liiska sugitaanka ee asalka ah ee ilmo kasta.

Haddii aadan garanayn lambarkan, la xiriir isku-duwaha adeegyada ilmahaaga. Waxay kuu raadin doonaan lambarka jira ee ilmahaaga.

### Miyay cilladu saamaysay helitaanka barnaamijka ee ilmo kasta?

Maya. Tani waxay ahayd cillad muuqashada xogta ah oo kaliya. Halka ilmuhu kaga jiro liiska sugitaanka kuma iman wax isbeddel ah.

### Ma jiraa ilmo seegay fursadda uu barnaamijka ugu biiri lahaa cilladan darteed?

Maya. Ma jiro ilmo ka hormaray ama laga daba mariyay halkuu kaga jiro liiska sugitaanka.

Carruurta xogtooda ay cilladu saamaysay waxay markii hore ahaayeen lambarrada 61–91 ee liiska sugitaanka. Tan iyo markuu barnaamijku bilaabmay, 53 boos ayaa u furmay carruurta ku jirta liiska sugitaanka.

Xafiiska ODDS ayaa siisay boosaskan carruurta kahor inta aysan dhicin cillada muuqashada xogta ah. Kama aynu bixinin boosas barnaamijka inta ay cilladu jirtay.

### Waa maxay booska ilmahaygu hadda kaga jiro liiska sugitaanka?

Fadlan la xiriir isku-duwaha adeegyada ilmahaaga. Way ka raadin karaan ilmahaaga liiska sugitaanka.

### Muxuu lambarka ilmahaygu uga hooseeyaa lambarkooda asalka ah?

Konton iyo saddex ka mid ah 155-kii carruur ee hore ee boos loo soo bandhigay ayaa doorteen in aysan ku biirin barnaamijka. Bishii Agoosto, xafiiska ODDS ayaa boosaskan furan siisay 53-tii carruur ee ugu horreeyay ee ku jiray liiska sugitaanka.

Haddii aad taqaan lambarka asalka ah ee ilmahaaga, ka jar 53 oo waxaad heli doontaa booska ay hadda uga jiraan liiska sugitaanka. Tusaale ahaan, carruurta xogtooda ay cilladu saamaysay waxay markii hore ahaayeen kuwo ku jira lambarrada 61-91. Hadda waxay 8-38 kaga jiraan liiska sugitaanka. Lambarradani waa kuwii ugu dambeeyay ee bisha Oktoobar 10, 2024.

## Sidee ayuu xafiiska ODDS u wadaagay cilladan?

Xafiiska ODDS ayaa waalidiinta ama mas'uuliyiinta carruurta 30-ka ah ee xogtooda ay cilladu saamaysay ula xiriiray telefoon, iimayl iyo/ama boosto ahaan. Waxaan wargelinay hay'adaha maareeya kiisaska iyo isku-duweyaasha adeegyada. Farriin ayaynu ugu diraynaa bulshada oo dhan iimayl ahaan taasoo sharrixi doonta wixii dhacay. Waxaan fariinta iimayl ahaan u diri doonaa inta u dhexaysa bisha Oct. 10–16. Farriinta ayaynu soo gelin doonaa mareegta ODDS. Waxaan ku soo qori doonaa su'aalahan inta badan la isweydiiyo bog-mareegeedka barnaamijka CEN Program.

## Sideen isku diiwaangeliyaa si aan u helo farriimaha bulsheed ee xafiiska ODDS?

Isku diiwaangeli farriimaheena bulsheed — liiska boostada "wargelinta ODDS" — adoo isticmaalaya gujoraacan. Farriimahan ayaynu soo dirnaa innagoo adeegsanayna GovDelivery.

## Waa maxay tallaabooyinka xigaa?

Walidiinta loogama baahna inay qaadaan wax tallaabo ah. Lambarrada liiska sugitaanka ee carruurtu hoos ayay u socon doonaan marka carruurta kale ay ka baxaan barnaamijka CEN Program, ay ka baxaan liiska sugitaanka ama ay diidaan boos ka bannaan barnaamijka.

Shaqaalaha barnaamijku waxay la xiriiri doonaan waalidiinta iyo isku-duweyaasha adeegyada ilmahooda haddii ilmahoodu ku jiro lambarka 1 ee liiska sugitaanka oo uu boos ka bannaanaado barnaamijka.

## Waxaan qabaa su'aalo ku saabsan barnaamijka CEN Program. Yay tahay inaan weydiiyo?

Fadlan la xiriir isku-duwaha adeegyada ilmahaaga. Waxaad sidoo kale iimayl ugu diri kartaa isku-duwaha barnaamijka Children’s Extraordinary Needs Program Coordinator, Yolonda Garcia iimaylka cenprogram@odhs.oregon.gov.

## Sideen ugu heli karaa Su'aalaha Soo Noqnoqda (FAQ) luuqad kale ama gaab kale?

Dokumeentigan waxaad ku heli kartaa bilaa lacag isagoo ah:

- Luuqado kale,
- Far waaweyn,
- Farta indhooleyaasha, ama
- Qaabka aad doorbidayso.

Si arrintani aad u samayso, ka wac xafiiska ODDS lambarka 503-945-5811 ama iimayl ugu dir dd.directorsoffice@odhsoha.oregon.gov. Waan aqbalnaa gudbinta wicitaanada ee loogu talagalay dadka ah:

- Dhegoolaha,
- Maqalku ku Adag Yahay,
- Dhegoole-Camoole,
- Dhegoole ama
- Aragga liita.

Si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan adeegyada gudbinta, booqo https://www.oregonrelay.com ama https://www.fcc.gov/general/internet-based-trs-providers.